



## Ku xirida Qoysaska Dugsiga Barbaarinta K-12 Philadelphia Intarnetka bilaashka ah ama Qiimaha Jaban

*Waxbarashadu kuma  
dhammaato fasalka.*

### Waa maxay PHLConnectED?

PHLConnectED waa hindisaha Magaalada si ay ugu caawiso qoysaska dugsiga barbaarinta K-12 si ay u helaan intarnet bilaash ah ama qiimo jaban.

### Sidee ayay PHLConnectED u caawisaa qoysaska?

- Inay codsadaan Barnaamijka Isku xirka La Awoodi karo (ACP) ee dawlada federaalka,
- Inay ku xirmaan Hagaha Dhijitalka ah si ay u helaan taageerada hal-ka-halka ah ee xagga gelitaanka iyo isticmaalka tignooloojiyada; iyo
- Inay helaan taageerooyinka dhijitaalka ah iyo agabyada kale ee laga heli karo Philadelphia oo dhan.

### Sida Loogu Xirmo

Si aad wax badan u ogaato, **wac 2-1-1**. Si aad u hesho adeegyada luqadda, **riix 8**.

Wuxuu khadka taleefoonka furan yahay 24 saac maalintii, 7 maalmood isbuucii waxaana lagu heli karaa in ka badan 150 luqadood.

### Reeraha u qalma ACP waxay heli karaan:

- Qiimo dhimis gaaraysa ilaa \$30 bishiiba oo ku wajahan adeegga awooda ballaaran leh; iyo
- Qiimo dhimis gaaraysa ilaa \$100 si ay ugu soo iibsadaan laabtob, kombiyuutarka miiska, ama tablet bixiyeyaasha ka qaybqaadanaya. Reerku waa inay soo uruuriyaan inta u dhaxaysa \$10 iyo \$50 oo ku aadan qiimaha qalabka.